



**Barnaamijyada Dugsiga Sare ee Kulliyada Caalamiga ah  
Tilmaamaha U qalmida iyo Sii wadida**

- **U qalmida Barnaamijka Diyaarinta Dugsiga Sare IB (fasalada 9 iyo 10):**
  - Dhammaan ka qeybqaatayaasha loogu tallogalay barnaamijka Diyaarinta Kulliyada Caalamiga ah waa inuu lahaadaa isku celcelis buundada fasalka simistarka deyrta (GPA) oo 3.0 ama ka sareeyo dhammaan maadooyinka muhiimka ah ee heerka fasalka. Codsadayaasha sare u kacayo ee fasalka 10<sup>aad</sup> waa in si guul ah loogu dhameystiraa ugu yaraan hal buundo luuqad ajaanib ah.
  - Dhammaan codsadaayaasha u qalma waa inay ka dhameystiraan labadaba codsiga onleenka Dooqa Dugsiga ee [www.yourchoicedekalb.org](http://www.yourchoicedekalb.org) iyo Codsiga Warqada IB ee dheeraadka ah oo laga helo websaydka Dooqa Dugsiga [www.dekalbschoolsga.org/school-choice/forms-and-brochures/](http://www.dekalbschoolsga.org/school-choice/forms-and-brochures/). Baakida Codsiga Warqada IB waa in loo i-meel gareeyaa ciwaanka i-meelka dugsi walboo IB sida lagu tilmaamay codsiga.
  - Intaas waxaa dheer codsiga onleenka iyo codsiga warqada, tallooyinka labo macalin waa in la gudbiyaa iyada oo la isticmaalayo tilmaamaha Codsiga Warqada IB ee laga helo websaydka Dooqa Dugsiga <http://www.dekalbschoolsga.org/school-choice/forms-and-brochures/>.
  
- **Tilmaamaha Sii wadida Barnaamijka Diyaarinta Dugsiga Sare IB (fasalada 9 iyo 10):** Dhammaan ardayda ka diiwaangashan waa inay joogteeyaan isku celceliska buundada fasalka guud (GPA) ee 3.0 ama ka sareeyo, tirada ugu yar ee heerka 71 oo dhammaan maadooyinka, iyo buuxinta sharuuda dalacsiinta inta lagu jiro sannadka waxbarashada. Ardayda aan joogteyn sharuuda waxqabadka waxbarashada waxaa la geliyaa tijaabada hal simistar. Waaladiinta waxaa looga baahanyahay inay ka qeybgalaan dhammaan shirarka. Qorshooyinka taageerada waxaa la siinayaa arday walba ee aan buuxin sharuuda waxqabadka waxbarashada:. Ardayda aan joogteyn buundada fasalka guud (GPA) ee 3.0 ama ka sareeyo, buundada tirada ugu yar ee 71 oo dhammaan maadooyinka iyo/ama aan buuxin sharuuda dalacsiinta ee dhammaadka muddooyinka labo buundeyn isku xigto ama labo simistar, waa inay ka baxaan barnaamijka Kulliyada Caalamiga ah oo iska diiwaangeliyo dugsiga gurigooda.



- **U qalmida Barnaamijka Dibloomada Dugsiga Sare IB (fasalada 11 iyo 12):**
  - Dhammaan codsadayaasha barnaamijka Dibloomada Kulliyada Caalamiga ah waa inay yeeshaan isku celceliska buundada fasalka simistarka deyrta (GPA) ee 3.2 ama ka sareeyo dhammaan maadooyinka muhiimka ah iyo dhameystir guul ah ee luuqada ajaanibta iyo fasalada hormarsan sida lagu tilmaamay Codsiga Warqada Dibloomada IB ee laga helo websaydka Dooqa Dugsiga ee [www.dekalbschoolsga.org/school-choice/forms-and-brochures/](http://www.dekalbschoolsga.org/school-choice/forms-and-brochures/).
  - Dhammaan codsadayaasha u qalma waa inay ka dhameystiraan labadaba codsiga onleenka Dooqa Dugsiga ee [www.yourchoicedekalb.org](http://www.yourchoicedekalb.org) iyo Codsiga Warqada IB ee dheeraadka ah oo laga helo websaydka Dooqa Dugsiga [www.dekalbschoolsga.org/school-choice/forms-and-brochures/](http://www.dekalbschoolsga.org/school-choice/forms-and-brochures/). Baakida Codsiga Warqada IB waa in loo i-meel gareeyaa ciwaanka i-meelka dugsi walboo IB sida lagu tilmaamay codsiga.
  - Intaas waxaa dheer codsiga onleenka iyo codsiga warqada, tallooyinka labo macalin waa in la gudbiyaa iyada oo la isticmaalayo tilmaamaha Codsiga Warqada IB ee laga helo websaydka Dooqa Dugsiga <http://www.dekalbschoolsga.org/school-choice/forms-and-brochures/>.
  
- **Tilmaamaha Sii wadida Barnaamijka Dibloomada Dugsiga Sare IB (fasalada 11 iyo 12):** Dhammaan ardayda ka diiwaangashan waa inay joogteeyaan isku celceliska buundada fasalka guud (GPA) ee 3.0 ama ka sareeyo, tirada ugu yar ee heerka 71 oo dhammaan maadooyinka, iyo buuxinta sharuuda dalacsiinta inta lagu jiro sannadka waxbarashada. Ardayda aan joogteyn sharuuda waxqabadka waxbarashada waxaa la geliyaa tijaabada hal simistar. Waaladiinta waxaa looga baahanyahay inay ka qeybgalaan dhammaan shirarka. Qorshooyinka taageerada waxaa la siinayaa arday walba ee aan buuxin sharuuda waxqabadka waxbarashada:. Ardayda aan joogteyn buundada fasalka guud (GPA) ee 3.0 ama ka sareeyo, buundada tirada ugu yar ee 71 oo dhammaan maadooyinka iyo/ama aan buuxin sharuuda dalacsiinta ee dhammaadka muddooyinka labo buundeyn isku xigto ama labo simistar, waa inay ka baxaan barnaamijka Kulliyada Caalamiga ah oo iska diiwaangeliyo dugsiga gurigooda.



- **Ka bixida Barnaamijka IB - Ardayda aan ka qeybgalkooda dugsiga aheyn dugsiga IB ee hadeer ay ka qeybgalayaan waa inay ku soo laabtaan dugsiga gurigooda haddii ay midkood ku quuldareystaan inay buuxiyaan sii wadida waxbarashada ama go'aansadaan inaysan rabin barnaamijka oo sabab walba. Ardayda looma ogolaanayo inay ku haraan dugsiga IB haddii aysan si joogta ah ugu jirin barnaamijka IB.**
- **Ka qeybgalka/Hab dhaqanka** Ardayda ka diiwaangashan Barnaamijka Dooqa Dugsi walba waa inay u hogaansamaan DCSD iyo ka qeybgalka dugsiga deegaanka iyo xeerarka hab dhaqanka iyo tilmaamaha si markaas loo sii wado.
  - Xad gudubyada hab dhaqanka – ardayda leh ugu yaraan sadex (3) edbin oo xadgudubyada heerka 3 ama ka sareeyo ayaa loo tixraaci karaa ka bixitaanka barnaamijka la xushay.
  - Ka qeybgalka – ardayda leh ugu yaraan shan (5) maqnaanshooyin laga cudur daartay ama ugu yaraan lix (6) soo daahitaano laga cudur daartay ayaa loo tixraaci karaa ka bixitaanka barnaamijka la xushay.